



## XANNAHI TILMAAN-BIXINEED

# Fahmizza Sida iyo Sababta Ilmahaagu Kuula Xiriiraayo



*Wada-xiriirku waa iskaashi ka dhexeeya dadka kana kooban in ka badan ereyo. Waynu wada xiriirnaa inagoo adeegsanayna hadal, dhaqdhaqaq jireed ama gacmeed, iyo cabbiraad weji. Wada-xiriirku naajax ahina wuxuu ka kooban yahay inaad wax fahamtid dadka kalena ay ku fahmaan.*

Ilmo qaba baahi gaar ahaaneed waxaa suurtagal ah inuu kuula xiriiro siyaalo ku adag dadka kale inay fahmaan. Waxaa suurgal ah inaanu ilmahaagu isticmaalayn haba yaraatee wax ereyo ah, laakiin marka ay ku geysa armaajada waxaad garaneysaa inay rabto buskud. Fahmizza sida ilmahaagu kuula xiriirayo iyo asbaabta ay kuula xiriirayso aaya kaa caawin karta inaad horumariso awoodeeda oo aad bartidna siyaalo kale oo ay kuula xiriirto.

### **Siduu ilmo ula xiriiro dadka:**

Horey ayaynu usoo sheegnay inay jiraan siyaalo kala duwan oo lagu wada xiriiro sida adeegsiga dhaqdhaqaajin jireed ama gacmeed (tusale,

far-fiiqid, gacanta oo la soo fidiyo (taago)), ereyo iyo tacbiir weji. Halkan waxa ah tusaalooyin sheegaya sida suurtagalka ah oo ilmahaagu uu kuula xiriiri doono:

- wuxuu eegayaa, gacantana u fidinayaa, ama farta ku fiiqayaa shay, waxqabad, qof ama sawir
- qof kale ayuu ku soo jiidayaa shay
- shay ayuu ku dhawaanayaa
- tacbiir weji ayuu muujinayaa
- indhaha ayuu kaa fiirinayaa
- wuxuu canjilayaa codadka iyo falalka
- ereyo ayuu isticmaalayaa
- wuu qeylinayaa waanu dhirfayaa
- wuxu muujinayaa asluub sida cararid uu

## Fahmidda Sida iyo Sababta uu Ilmahaagu Kuula Xiriiraayo, waa socotaa

---

carayaayo, wax jugeyn (garaacid) ama qaniinyo  
uu wax qaniinayo.

- wuxuu istimaalayaa astaamo gacmeed (luqadda astaamaha)

Waxaa suurtagal ah inuu ilmahaagu isticmaalo si isku mid ah oo uu kuula xiriiro asbaabo kala duwan dartood. Tusaale ahaan, waxaa suurtagal ah inay qeyliso markay wax farax geliyaan ama marka ay isku dayeyso inay ka fogaato inay cunto cuntada qaarkood.

### ***Waa maxay sababta ilmuuhu kuula xiriirayo:***

Waxaa jira asbaabo fara badan oo aynu u wada xiriirno. Qaar ka mid ah asbaabta uu ilmahaagu kuula xiriirayana waxaa ka mid ah:

- inuu ku weydiyo shay ama waxqababad
- inuu kaa codsado inaad u raaxeyso
- inuu ku weydiyo macluumaa
- inay ku diiddo (ayadoo ku tusinaysa waxayna rabin)
- inay ku salaanto
- inay kula qeybsato wax ay xiisneyaso
- inay cabbirto shucuurteeda



### ***Adigoo ilmahaaga ka caawinaya luqad***

Wabarashada ugu horreysa oo ilmo yeesho waxaa keena waayo-aragnimada ay ka mid yihiin aragtida, maqalka, taabashada, dhadhaminta iyo urinta. Sida badan, carruurtu waxay fahmaan ereyo badan ka hor intaanay bilaabin inay yiraahdaan ereyadoo ugu horreeya. Marka aad siiso ilmahaaga fursado uu ku maqlo ereyada xiriirka la leh wadciyo isku mid ah oo soo noqnoqda ayaa fahamkaasi kaalmo ka geysan doonta. Waxaa suurtagal ah inuu ilmahaagu eego, ama tiigsado, shay aad magacowday ka hor intaanay oran ereyga. Tusaalle, marka aad ku tiraahdo ilmahaaga “caano”, waxaa suurtagal ah inay eegto dhaladeeda, maxaa yeelay waxay ereyga ku xiriirineysaa dhaladeeda. Taas ayaana kuu muujineysa inay fahamtay ereyga.

Waxaad ilmahaaga ka caawin kartaa inay ku fahamto adigoo:

- La fadhiya ilmahaaga fool-ka-fool marka aad la hadleyso.
- Istimaalaya dhaqdhaqaajin jireed ama gacmeed, walaxo, ama sawirro iyo ereyadoodii oo la socda mid walba (tusaale: dharbaaxo fudud ku dhifo kursi marka aad oraneyso “Fariiso” si aad ugu caddeyso waxa aad ka rabto iney samayso).
- Magacaabaya waxa ay qabaneyso ama ay xiiso u qabto (tusaale: dheh “Jesika waxbay rinjiyeynaysa” marka ay wax rinjiyeynayo).
- U sheegaya erey xiriir la leh waxa ay qabaneyso (tusaale: “Sare, sare” marka ay bulukeeti ka dhiseyso dhismo dheer).
- Si qunyar ula hadlaaya una adeegsanaya si waadax ah ereyo aan badnayn oo aan isbeddelayn (tusaale: “Geli indhaha” marka adiga ama ilmahaagu indhaha aad dhex dhigtaan tooy leh Madax Baradho ah).
- Carrabka ku adkaynaya ereyada muhiimka ah (tusaale: “ma casiir baad rabtaa”).
- U sheegaya waxa bey’adda ku dhex jira

*Fahmidda Sida iyo Sababta uu Ilmahaagu Kuula Xiriiraayo, waa socotaa*

---

(tusaale: adigoo oranaya “bas” marka ay eegayso bas idin ag maraaya).

## ***Adigoo ilmahaaga ka caawinaya inuu ku***

Marba haddii ay bilowdo ilmahaagu inay adeegsato ereyo, waxaa suurtagal ah inay si madax-bannaani ah kaaga daba-tiraahdo waxa aad tiraahdo ama aad isticmaasho. Marka hore, waxaa suurtagal ah sida ereyga loogu dhawaaqo (sida ay ereyga u tiraahdo) inaanu sax ahayn. Xusuusnow inay waqtii qaadato in la barto si dadka loola xiriiro oo ay waalidka iyo carruurtaba ku noqon karto jaho-wareer.

Waxaad ilmahaaga ka caawin kartaa inay nafteeda cabirto adigoo:

- Siinaya waqtii ay kuugu jawaabto – hal mar ah wax weydii dabeetana ka sug jawaabta.
- Ku dayanaya ereyadeeda iyo falalkeeda.
- U af-celinaya waxa ay rabto inay tiraahdo (tusaale: haddii ay tiraahdo “oh-oh”ayadoo farta ku fiiqaya wax dhacay, u sheeg kuna dheh “dhacay”).
- Ku dhiirrigelinaya ilmahaaga inay dhammayso jumladda adigoo xarafka u dambeeyaa ka tegayaa (tusaale: Shagagga basku waa ay\_\_\_\_\_”).
- Uga jawaab-celinaya dadaalkeeda ay ku dadaaleyso inay kula xiriirto – faallo ka bixi wixii ay tiraahdo.
- Siinaya wax-kala-doorasho (tusaale: “Ma caano ayaad rabtaa mise casiir?”).
- Wax ku kordhinaya waxa ay kugu tiraahdo (tusaale: haddii ay tiraahdo “ey”, adna waxaad tiraahdaa “ey weyn”).